Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Ilaah Wuu Tijaabiyey Jacaylka Abraham



Waxa qoray: Edward Hughes


Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot, Tammy S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Habeen buu Ilaah amar yaab leh siiyey Abraham. Waxaana lagu tijaabiyey in la eego inuu wiilkiisa ka jecel yahay in ka badan Ilaah.

"Kaxee wiilkaaga Isaaq, oo iigu bixi sidii Allabari guban," Ilaah baa sidaa ku amray. Sadaqee Isaaq? Ilaah dartii u gowrac wiilkaaga? Taasi aad bay ugu adkaatay Abraham. Aad buu u jeclaa inankiisa.




Laakiinse Abraham wuxuu bartay oo uu yaqaanay rumeysadka Ilaah xitaa haddii uusan fahmayn micno.



Aroortiiba wuu isdiyaarshay oo buurtii waaqdhaaca ayuu kaxeeyey wiilkisii Isaaq iyada oo ay la socdaan lab aka mid ah shaqaalihiisii.



Intii uu ambabaxin, Abraham xaabadiisii buu jarjartay si uu dabka waaqdhaaca Allabariga ugu samaysto. Qorshaha Abrahamna wuxuu ahaa adeecidda Ilaah.





Saddex cisho ka dib bay ag-tageen buurtii. "Jooga halkan" buu ku yidhi shaqaalihiisii. "Waannu soo cibaadeysanaynaa, oo waannu idinku soo noqoneynaa." Isaaq xaabadii buu qaaday; Abrahamna qorigii dabka iyo Mindidii buu qaaday.

"Aaway wankii Allabariga la gubo loo bixin lahaa?" Isaaq baa weyddiiyey. "Ilaah qudhiisa ayaa keeni doona wanka" buu ugu jawaabay Abrahmna.





Labadoodiiba waxay yimaaadeen bartii uu Ilaah u doortay hawshan. Halkaa, Abraham wuxuu ka dhistay meeshii Allabariga oo wuxuu diyaarsaday qoryihii lagu gubi lahaa Allabariga Ilaah hortiisa.




Abraham wuxuu dhistay meelo badan oo allabariyo. Runtii middan waa middii ugu adkayd.

Abraham wuxuu ku dul xidhay wiilkiisii uu jecla meeshii Allabariga.  Runtii Abraham ma wuxuu doonayaa inuu adeeco Ilaah oo uu gawraco wiilkiis wanaagsanaa ee Isaaq?





Haa! Mindidii oo
aad u afeysan kor
u qaaday. Laga
yaabee isaga oo
qalbi jabsan,
laakiinse Abraham
waxa uu granayayey
inuu adeeco Ilaah.


"JOOJI"
Malaa'ktii Rabbiga baa qaylisay sidaa. "Iminka waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid. Gacanta ha saarin wiilka, wiilkaaga keliya, oo xaggayga ka yimid."


Lagayaabe Isaaq inuu sidan ku fekeray, "Ilaah baa keenay, sidii kolkii hireba uu Aabahay igu yidhi."

Isla kolkaa ay Aabbaha iyo wiilka wada cibaadeysanayee, Malaa'iktii Rabbiga ayaa la hadashay Abraham. "Caruurta farcankaaga ayay dunida oo dhan ku barkadoobi doonaan, sabatoo ah adigu waad adeecadnimadad awgeed" maalin unbaa, Ciise ka dhalan doonay farcankii caruurta Abraham.



Aqalkoodii bay ku soo noqdeen Abraham iyo Isaaq. Wakhti yar ka dib, nasiib darro waxaa geeriyootay Sahra. Abraham xaaskiisii buu waayay, oo Isaaqna hooyadii buu waayey.



Xilligii dugtii/Aaskii ka dib, Abraham taliyihii shaqaalihiisa ayuu u diray raadiyo gabadh uu guursado Isaaq.



Shaqaalihiina wuxuu uga doonay oo uu aaday deegaankoodii hore inuu gabadh uga soo helo qaraabadii Abraham dhexdooda.



Shaqaalihii Ilaah buu weyddiistay calaamad. "Bal eeg gabadha geeleyga waraabisa weeye midda ku haboon inuu Isaaq." Durbadiiba Rebeqa ayaa biyo siisay. Waxayna ka mid ahayd ehelldii iyo qaraabadii Abraham. Midddinkii wuu gartay Ilaah inuu u aqbalay baryadiisii.



Rebeqa wey ka tagatay reerkoodii oo Isaaq baa guursaday. Weyna raalligelisay Isaaq ka dib geeridii hooyadii. Aad buuna u jeclaa iayada!



# Ilaah Wuu Tijaabiyey Jacaylka Abraham

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 22-24

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16